neighborcare health

# XUQUUQAHAAGA IYO IN LAGAA ILAALIYO BIILASHA CAAFIMAADKA EE LA SOO DIRO EE LAMA FILAANKA AH

Marka daryeel degdegga ah aad hesho ama ay ku daweeya daryeel bixiye oo bixiye ka baxsan shabakada xarunta gudaha, waxaa lagaa ilaalinayaa biilasha la ma filaanka ah ee la isu soo diro ama biilasha baaqa ah.



Daryeel **BIXIYE SHABAKADA KU JIRA** waa daryeel bixiye caafimaad oo ku jira shabakada kaarka caymiska caafimaadka ee aad haysato.

Daryeel **BIXIYE SHABAKADA KA BAXSAN** waa daryeel bixiye caafimaad oo heshiis aan la saxiixin caymiskaaga caafimaadka.

## Waa maxay "biilka baaqa"?

**(mararka qaar waxaa loogu yeeraa "biil dad ka yaabiya")**

Markaad dhakhtar u tagto ama aad tagto meel daryeel caafimaad laga bixiyo, waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho ama lagugu soo dalaco kharashyo inta adiga kugu soo aado ka baxsan, sida lacag-bixin dheeri ah, bixinta lacagta caymiska ee la isla wadaago, iyo/ama lacagta adiga kugu soo aada. Waxaa dhici karta inay jiraan kharashyo kale ama ay tahay inaad bixiso dhammaan biilka oo dhan haddii aad tagto xarun daryeel caafimaad laga bixiyo oo aan ahayn shabakada qorshaha caymiskaaga caafimaadka ama ka baxsan.

"Meel shabakadda ka baxsan" waxaa loola jeedaa xarun caafimaad ama daryeel bixiye caafimaad oo heshiis aan la la'hayn ama la saxiixin qorshaha caymiskaaga caafimaadka. Daryeel bixiyeyaal shabakadaha ka baxsan ayaa laga yaabaa in loo ogolaado inay kugu soo dalacaan faraqa u dhexeeya waxa qorshahaagu kugula heshiiyey inuu bixiyo iyo lacagta buuxda ee adeega lagugu dalaco. Tan ayaa waxaa loogu yeeraaa "**biilka baaqa**." Waxay u badan tahay in lacagtan ay ka badan tahay kharashyada isla adeeg bixiye ama xarun ku jirta "shabakadda" oo laga yaabo inaan lagu tirin xadkaaga jeebka ka baxsan ee sannadlaha ah ee adiga aad bixinayso. Xadka inta adiga jeebkaaga aad ka bixinayso ee qorshahaaga caymiska caafimaadka waa xadka qaddarka lacagta aad ku bixiso adeegyada daryeelka caafimaadka ee sanad qorshiyeedka ee lagaa bixinayo.

**"Biilka dad ka yaabiya"** waa biilka baaqa ee lama filaanka ah. Tan waxay dhici kartaa marka aadan kala xakameyn karin cidda daryeelka ku siinaysa aadan kala oggayn-sida marka ay kugu timaado xaalad degdeg ah ama marka aad ballan ka qabsato xarun shabakada ku jirta laakin aad isku aragtaan ama ku daweeyaan takhtar shabakada caymiska ka baxsan.

**Ma qabtaa wax su'aallo ah?** Adeegyada biilasha Bukaanka Caafimaadka ee Neighborcare kala xiriir **206-548-3100** ama iimaylkan kala xiriir **patientbilling@neighborcare.org**

# Waxaa lagaa ilaaliyay biilka baaqa ee la iska soo dalaco ee dhanka:

## Adeegyada deg-degga

Haddii ay ku qabsato xaalad caafimaad oo deg-deg ah oo adeegyo aad ka hesho xarunta adeegga deg-degga ee xarun shabakadaada ka baxsan ama isbitaal, lacagta ugu badan ee xarunta ama takhtar uu kugu soo dalaci karo waa lacagta la isla wadaago ee sida shabakada caymiskaaga oo kale (sida lacagta la isla bixiyo ama bixinta lacagta caymiska ee la wadaago). Adiga **ma awoodi kartid** in lagugu soo dallaco biil baaq ee adeegyadan degdega ah. Tan waxaa ku jira adeegyada ay dhici karto in aad hesho marka xaaladda ay deggan tahay. *(Fiiro gaar ah: Waxaa laga yaabaa in lagugu dallaco adeegyada deg-degga haddii aad bixiso ogolaansho qoraal ah si aad uga baxdo ilaalintaada biilka baaqa ee adeegyadan xasilinta kadib.)*

**Marna lagama rabo inaad ka tanaasusho ilaalintaada biilasha baaqa. Sidoo kale lagaaga ma baahna in daryeel aad ka hesho xarun ama tarkhtar shabakada ka baxsan. Waxaad dooran kartaa takhtar ama xarun caafimaad ku jirta shabakada qorshahaaga caymis caafimaad.**

## Marka aan la oggolayn biilasha baaqa, sidoo kale waxaad kale oo aad xaq u leedahay ilaalada soo socota:

- Adiga waxaad kaliya aad mas'uul ka tahay in aad bixiso qaybtaada qarashka (sida qayb-bixinta, bixinta lacagta caymiska ee la wadaago, iyo lacagaha laga jarayo ee aad bixin lahayd haddii aad u tagto daryeel bixiye (dhakhtar) ama xarun shabakada ku jirta). Qorshahaaga caymiska caafimaadka ayaa si toos ah u siin doona daryeel bixiyayaasha iyo xarumaha daryeel bixiyahaaga ee shabakada ka baxsan.
- Qorshahaaga caymiska caafimaadka guud ahaan waa inuu:
  - Waa inay bixiyaan adeegyada xaaladda deg-degga adiga oo aan lagaaga baahan in adeegga horey aan loo ansixin (ogolaanshaha hore).
  - Waa inay bixiyaan adeegga deg-degga ee ay fidiyeen xarumaha shabakada ka baxsan.
  - Iyadoo lagu salaynayo inta xarunta ama daryeel bixiyaha ay kugu leeyihiin (kharash-wadaaga) waxa ay bixinayso adeegga bixiyaha ama xarunta shabakada ku jirta oo waa inay muujisaa cadda manfacaaga oo sharaxa.
  - Tiri ama xisaabi lacag kasta oo aad ku bixiso adeegyada deg-degga ah ama adeegyada shabakadaha ka baxsan ee ku baxa xadka lacagta adiga kugu soo aada iyo xadka inta jeebka laga bixiyo.

Haddii aad aaminsantahay in si khaldan laguugu soo dalacday, waxaad booqan kartaa *cms.gov/nosurprises/consumers* ama waxaad wici kartaa *1-800-985-3059*. Booqo *cms.gov/nosurprises* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada hoos timaada sharciga dowladda federaalka.

## Waxaad xaq u leedahay in aad hesho "Good Faith Estimate" ("Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashka") oo sharxaysa inta ay ku kacayso daryeelkaaga caafimaad.

Sida sharciga uu qabo, daryeel bixiyayaasha caafimaadka waxay u baahan yihiin in **bukaannada aan haysan caymis caafimaad (kaarka caafimaadka) ama aan isticmaalin qiyaasta caymiska** ee biilka adeegyada iyo hal-hal u kala qaada qarashka caafimaadka.

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashka ee wadarta guud ee kharashka la filayo oo hal-hal loo kala qaaday ama adeegyada daawaynta aan degdegga ahayn. Qiyaasta kharashyada la xiriira waxaa ka mid ah sida shaybaarka caafimaadka, daawooyinka dhakhtar qoray, qalabka, iyo khidmadaha isbitaalka lagaa siiyo.
- Hubi in daryeel bixiyahaaga caafimaadka uu qoraal ahaan ku siiyo Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashka ugu yaraan hal maalin ka hor inta aan laguu fidin adeegaaga ama howshaada caafimaadka. Sidoo kale waxaad daryeel bixiyahaaga caafimaadka, iyo daryeel bixiyayaasha kale ee adiga aad doorato, inay ku siiyaan qoraalka Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashka ka hor inta aanad ballansan adeeg ama howlaha kale ee aad uga baahan tahay.
- Haddii aad hesho biil kaas oo ugu yaraan ah $400 ka badan Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashka, biilkaas waad ka doodi kartaa.
- Hubi inaad kaydsato nuqul ama sawirka ka samaysato Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashkaaga.

Wixii su'aalo ah ama macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaqa adiga aad u leedahay Qiyaasta ugu Wanaagsan ee Qarashka (Good Faith Estimate), booqo *cms.gov/nosurprises* ama wac 1-800-985-3059.